Xarumaha Jirooyinka Asalraaca ah (*Klinisch Genetische Centra*) waxey ku yaallaan:

Sheybaaryada isbitaalada waaweyn badankooda Dhiigyarida Leyska Dhaxlo dhiigaaga wey ka baari karaan ama sheybaar ku taqasusay ayey kuu gudbin karaan.

Amsterdam (AMC 020-5665281)
Amsterdam (VU 020-4440150)
Groningen (050-3632929)
Leiden (071-5266090)
Maastricht (043-3875855)
Nijmegen (024-3613946)
Rotterdam (010-4636915)
Utrecht (030-2503800)

Sheybaarka ugu qabiirsan marka la eego baaritaanka Dhiigyarada Leyska Dhaxlo waa sheybaarka Hemoglobinopathieën ee Xarunta Asalraaca Bin'aadamka iyo Jirooyinka (*Centrum voor Humane en Klinische Genetica*) ee Xarunta Caafimaadka Jaamacadda Leiden (*Leids Universitair Medisch Centrum*)

(071 5269800) O&O dhismaha, Einthovenweg 20,
Postbusnummer 9600,2300 RC Leiden
E-mail: P.C.Giordano@LUMC.nl
http ://www.hbpinfo.com

Leidefl

Dhiigyarada Leyska Dhaxlo (*Erfelijke bloedarmoede*)?

In lagu baaro faa'iido ma leedahey? ?

IQoraalkaan sharraxaadda ah waxaa qaabkaan loo sameeyey januari 2001 waxaana sameeyey:
Sheybaarka Hemoglobinopathieën ee Leiden.
Iyadoo ey ka warqabaan (wax ka hogaaminayaan):
Ururka dhibanayaasha (*Patiënten vereniging*) O.S.C.A.R. Nederland
Hey'adda (*Stichting*) SANITAS Nederland
Ururka waalidiinta iyo ururada dhibanayaasha ee wadashaqeynaya (*Vereniging van Samenwerkende Ouders en Patiënten Organisatie*)

Vertaling 3213865 TVcN

Dadka wadamada malaariyadu ku badan tahey ama ku badnaan jirtay ka yimid, waxey ahaan karaan kuwo jirkoodu uu dhiigyarada leyska dhaxlo sito. Taana waxaa keenaya maadaama dadka jirkoodu uu dhiigyarada leyska dhaxlo sito ey yihiin kuwo jirkoodu uu halista jirada malaariyada ka difaacan yahey.

Dhiigyarada leyska dhaxlo badanaa qofka sitaha ah jiro uma keento. Dadka sitayaasha ahina badanaa waa dad caafimaad qaba, laakiin mararka qaarkood dhiigyari aan sidaa usii cusleyn ayey qabi karaan. Taasina iney dhibaato u keento waa wax dhif-dhif ah. Nederland waxaa ku nool dad badan oo badda Midetareeniyanka (*Middellandse Zee*), Afrika ama Aasiya ka yimid. Dad badan oo Nederland ah ayaa leh waalid asalkoodii hore meelahaa ka yimid. Dadkaasina waxey ahaan karaan sitayaal unugyadaa dhiigyarada leyska dhaxlo ah. Mararka qaarkoodna dhiigyarada leyska dhaxlo nooceeda qatarta sida jirada **thalassemie major iyo sikkelcelziekte**, ayaa caruurtoodu ku dhici karta. Site-nimada dhiigyarada leyska dhaxlo waxey heysaa 20-kii qofoobda 1 qof dadka adduunka ku nool oo dhan maadaama ey dadka malaariyada ka difaacdo. Laakiinse nooca dhiigyara leyska dhaxlo ee site-yaashu sitaan, shacabyada adduunka qolaba waa si (qolaba qolada kale waa ka duwan tahey).

Bulshada Nederland, horey uma aheyn bulsho mallaariyadu caafimaadka shacabkooda qatar ku heyn jirtay, dadka dhiigyarada leyska dhaxlo qabaahina waa:

- Qiyaastii 1.300-dii qofoodba 1 qof ayaa Waqooyiga Yurub ka yimid.
- Qiyaastii 30-kii qofoodba 1 qof ayaa waa hore waalidiinta uu kasoo askumay ey dhulalka malaariyadu ka jirto ka yimaadeen.
- Qiyaastii 15-kii qofoodba 1 qof ayaa mar dhow wuxuu ka yimid wadamada ah ama ku dhow-dhow Midetareeniyanka (Turki, Marooko, Itaaliya, Giriiga iwm), Afrika, Bartamaha iyo Bariga Fog (Shiina, Hindiya, Induniisiya, Koofur-bari Aasiya) iyo
- Wadamada Kariibiyanka (Suriname, Curacao, de Nederlandse Antillen iwm)



Inkasta oo dadka sitayaasha ahi eysan wax dhib ah ku qabin ku jiraantaanka ey calaamadahaasi jirkooda ku jiraan, hadda waa muhiim in la ogaado in qofku uu dhiigyarada leyska dhaxlo qabo in kale. Taana seddex waxyaabood ayaa sabab looga dhigi karaa:

- Dhiigyarida kaniiniyada birta ayaa badanaa lagula tacaalaa (daaweeyaa). Haddii uu qofku dhiigyarada leyska dhaxlo qabo, markaa ka daaweyntu wax loo baahan yahey ma aha ama mid dhibaato keenta ayeyba noqon kartaa.
- Wixii caafimaadxumo ah tusaale ahaan (daalnaashada) dadka dhiigyarida leyska dhaxlo qaba, waxaa marmar ku sababi kara waxyaabo kale oo jirka naaqus ka ah (ku yar) sida *foliumzuur* (fitimiinada biyaha lagu dhexrido), kuwaasoo si fudud loo siin karo (lagu duri karo).
- Sababta seddexaad ee ugu muhiimsan waa qatarka jirta haddii labada waalidba ey yihiin kuwo ah sitayaasha dhiigyarida leyska dhaxlo. Waalidiintaas oo iyagu kuwo caafimaad qaba ah, waxey dhali karaan caruur dhiigyarada nooca halista ah qaba.

Baaritaan fudud oo dhiigaaga lagu sameeyo ayaad si fudud ugu ogaan kartaa inaad tahey qof ah sitaha dhiigyarada leyska dhaxlo iyo in kale. Baaritaankaasna dhaqtarkaaga qoyska (*huisarts*) ayaa kuu abaabuli kara, waxa kaliya ee loo baahan yaheyna waa hal dhalo oo dhallooyinka yaryar ee dhiiga lagu qaado ah.

Waxaa qaasatan muhiim ah ineysan wax welwel ah ku gelin haddii ey caddaato inaad tahey qof ah sitaha dhiigyarida leyska dhaxlo. Qofka ah (nin ama naag) sitaha dhiigyarada leyska dhaxlo, sitenimadaasi jiro kuma noqoto. Wixii daaweyn ah oo xanuunada sida daalka badan ku saabsanna qaabkaas ayaa sida u habboon ee wax looga qaban karo ah.

Site-nimadu mid la'isku daaran karo ma aha, mana aha mid jirro run ah isku bedeli karta.

Haddii aad ku talo jirto inaad caruur dhasho, aadna tahey qof ah sitaha dhiigyarada leyska dhaxlo, waxaa markaa muhiim kuu ah inaad ogaato in qofka aad is-qabtaan uu isna yahey qof ah sitaha dhiigyada leyska dhaxlo.

Dadka is qaba ee caafimaadkoodu taamka yahey isla markaana labadooduba ey sitayaasha dhiigyarada leyska dhaxlo yihiin, caruur caafimaadkoodu fiican yahey wey dhali karaan.

Vertaling 3213865 TVcN

Laakiin mar kasta 4-tii uurba 1 ayaa wuxuu ka noqon karaa ilmo qaba jirada dhiigyarada nooceeda culus (halista ah). Cunugaasoo inuu ka daawoobo eysan suuragal aheyn amaba ey culus tahey. (fiiri sawirka)
Waalidiinta raba iney caruur dhalaan, labadooduna ah sitayaaha dhiigyarada leyska dhaxlo (**ninka iyo naagta qatarta u ah iney ilmo qaba dhalaan**) waxaa jira qaab ey uga hortegi karaan iney dhalaan ilmo qaba jirada dhiigyarada nooceeda halista ah. Haddii aad adigu ama/iyo qofka aad isqabtaan midkiin ama labadiinaba aad tihiin dad sitayaal ah, waxaad wixii wargelin ah kala xiriiri kartaan dhaqtarkiina qoyska (*huisarts*), waxaadna isaga ka codsan kartaan inuu idiin gudbiyo Xarumaha Jirooyinka Asalraaca ah (*Klinisch Genetische Centra*) si aad talo iska-dhaxlidda ku saabsan la'idiin siiyo ama riskigiinu heerka uu yahay loo baaro.

Bogga xita xoogaa taleefano ah ayaa ku yaalla.